



Barnaamijka Dakhliga Kabitaanka ah ee Lambarka Bulshada (SSI)

Miiska ku jira

Waa maxay SSI?	1
Gargaarka Caafimaadka (Ceymiska)	1
Adeegyada kale ee Bulshada	2
Lacagta SSI ee la bixiyo bil kasta	2
La Xiriirka Lambarka Bulshada	3

Waa maxay SSI?

SSI ama Macaashka Kabitanka Dakhliga (SSI) ee Lambarka Bulshada, waa barnaamij ay dawladda dhexe maamusho oo dadka u baahan lagu siiyo lacag caddaan ah. SSI waxaa la siiya dadka da'doodu tahay 65 ama ka weyn, iyo sidoo kale dadka indhaha la' ama naafada ah da'dii ay doonaanba ha ahaadeene, oo ay ka mid yihiin caruurta.

Si aad xaq u yeelato waa in dakhligaagu yar yahay ama aadan dakhliiba laheyn hantidaaduna kooban tahay. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in hantida ay heysataa ay ka yar tahay \$2,000 haddii aadan xaas laheyn ama ay ka yar tahay \$3,000 haddii aad xaas tahay. Xisaabta kuma darno qiimaha uu joogo gurigaaga haddii aad degan tahay iyo sidoo kale gaarigaaga. Qiimaha hanti kale oo aan la xisaabeyn ayaa jira sidoo kale, sida naxashka qabriga, isna lama xisaabay.

Si lagu siiyo SSI, waa inuu jiraa gargaar aad ka hesho dawladda si aad xaq ugu yeelato. Si lagu siiyo SSI waa in aad ku noolaataa Mareykanka ama Waqooyiga jasiiradaha

Islands. Haddii aadan heyusan dhalashada Mareykanka, ama aad si sharci ah ku degan tahay Mareykanka, waxa aad suurogal in aad xaq u leedahay SSI. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heleysaa *Supplemental Security Income (SSI) for Noncitizens* (Publication No. 05-11051-SO).

Gobolka California lacag ayuu ku daraa lacagta dawladda dhexe. Lacagta halkii mar lagu siiyo bilowga bil kasta waxa ay isugu jirtaa lacagta SSI ee dawladda dhexe iyo kabitaanka dakhliga ee California.

Gargaarka Caafimaadka (Ceymiska)

Haddii lagu siiyo SSI waxa aad xaq u leedahay gargaarka caafimaadka (Medi-Cal) si toos ah. Waa muhim in aad si gaar ah u codsato Medi-Cal. Haddii aad qabto wax su'aal ah oo ku saabsan Medi-Cal, la xiriir xafiiska caydha ee degmadaada.

Barnaamijka Gargaarka ee Nafaqeynta (SNAP)

Dadka qaata macaashka SSI ee California ma qaadan karaan Barnaamijka Kabitaanka Gargaarka Nafaqada (SNAP), ee horey loogu yiqiin “food stamps” waayo gobolku waxa uu lacag ku daraa lacagta SSIda ah.

Hase yeeshee, waxa suurogal ah in aad xaq u yeelato SNAP:

- Inta aad sugayso in go'aan laga gaaro codsiga SSIda.
- Haddii la diido codsiga SSIda.
- Haddii aad u guurto gobol kale.
- Laga bilaabo bisha Agoosto ee 2016ka, bilaha macaashkii aad qaadan laheyd ee SSI la joojiyey ama dib loo dhigay.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxa aad kala xiriir kartaa xafiiska caafimaad iyo adeegga dadweynaha.

Adeegyada kale ee Bulshada

Dadka ka soo baxa shuruudaha SSI waxa ay inta badan xaq u yeeshaan barnaamijyo iyo adeegyo kale oo dheeraad ah oo hay'adaha caafimaadka iyo adeegga dadaweynaha ee degaanku ay bixiyaan. Adeegyadaas ama macaashyadaas waxaa ka mid noqon kara:

- Gargaarka gaarka ah ee la siiyo eeyda caawisa dadka indhaha la'a ama naafada ah;
- Qaar ka mid adeegyada gaarka ah ee daryeelka qofka ayaa loo fidiyaa dadka da'da ah, indhaha la', oo naafada ah oo aan naftooda wax u qabsan karin oo aan si nabadgelyo ah isu noolaan karin guryahooda ayaa adeegyadaas loo fidiyaa; iyo
- Adeegga badbaadinta.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxa aad kala xiriir kartaa xafiiska caafimaad iyo adeegga dadweynaha.

Lacagta SSI ee la bixiyo bil kasta

Shaxda hoose ayaa lagu muujiyey wadarta lacagta dawladda dhexe iyo tan gobolku bixiyo. Dadka qaata SSI dhamaantood lacag ugu badan lama siiyo. Lacagta lagu siiyo way yaraan haddii dakhli kale ku soo galo.

Darajada	Lacagta bil kasta 2018		
	Da'da	Naafo ah	Indhaha la'
Qofka kaligiis ah			
Kalgiiod degan (aan daryeel caawinaad u baahneyn)	\$910.72	\$910.72	\$967.23
Daryeelka loogu fidiyo dibadda ee aa caafimaadka aheyn	\$1,173.37	\$1,173.37	\$1,173.37
Daryeel aan la xiriirin caafimaadka oo dibadda loogu fidiyo, cunto looma kariyo	\$997.04	\$997.04	Ma khuseyso
Qof kale gurigiisa ku tirsan	\$664.24	\$664.24	\$720.76
Ilmo yar oo naafo ah		\$815.15	
Ilmo yar oo naafo ah oo qof kale guriigsa ku nool		\$568.67	
Lamaane da'a ah ama naafo ah			
Aan naafo aheyn umana baahna in la caawiyo	\$1,532.14		
Daryeelka loogu fidiyo dibadda ee aa caafimaadka aheyn	\$2,346.74		
Daryeel aan la xiriirin caafimaadka oo dibadda loogu fidiyo, cunto looma kariyo	\$1,704.77		
Qof kale gurigiisa ku tirsan	\$1,162.41		
Lamaane inho la'a			
Aan naafo aheyn umana baahna in la caawiyo			\$1,683.19
Qof kale gurigiisa ku tirsan			\$1,313.46
Daryeelka loogu fidiyo dibadda ee aa caafimaadka aheyn			\$2,346.74
Qof indha la'a oo xaas/say u ah qof da'a weyn oo naafo ah			
Aan naafo aheyn umana baahna in la caawiyo			\$1,625.65
Qof kale gurigiisa ku tirsan			\$1,255.92
Daryeelka loogu fidiyo dibadda ee aa caafimaadka aheyn			\$2,346.74
Degan Goob caafimaad oo Medicaid ay bixiso			
Qofka kaligiis ah	\$51.00	\$51.00	\$51.00
Labadii qof	\$102.00	\$102.00	\$102.00

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay

maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my Social Security* xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-11125-SO | January 2018
Barnaamijka Dakhliga Kabitaanka ah ee Lambarka Bulshada (SSI)
Supplemental Security Income (SSI) in California (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha